



UNHCR
The UN Refugee Agency

LA SAMEEYO, AAN LA SAMAYN, iyo WAXA LAGU YIRAAHDO KA SOO BADBAADAYAASHA GBV-ga

Rabshada ku salayasan-jinsiga (GBV) waa fal kasta oo waxyeelo ah oo **ka dhan ah qofka kuna salsysan kala duwanaanshiyaha bulsho ee u dhaxeeya labka iyo dhediga**. Waxaa ka mid ah falal sababa dhaawac jireed, galmo ama maskaxeed ama rafaad, hanjabaad, qasbitaan, iyo in la xadido xoriyada. falalkani waxa ay u dhici karaan si guud ahaan ah ama si gaar ah. GBV waxa laga yaaba inuu saameeyo ragga, haweenka iyo caruurta, laakiin badanaa waxa uu saameeyaa haweenka iyo gabdhaha dhamaan bulshooyinka.



GBV waxa laga yaaba inuu saameeyo **caafimaadka, caafimaadka maskaxda, amaanka ama xaalada dhaqaala ee badbaadaha** iyo in qofka lagu jiheeyo adeegyada taageero ee khuseeya.

****Rabshadu weligeed ma aha eedda qofka la kulma waana in dadka oo dhan loola dhaqmo loona taageero si xushmad leh.****

LA SAMEEYO:

- ✓ **SAMEE** inaad ogaato **adeegyada diyaarka ku ah** aagagaarkaaga oo la wadaag macluumaadka saxda ah.
- ✓ **SAMEE** inaad **dhagasyto** oo aad waydiiso baahiyaha iyo hanjabaadaha.
- ✓ **SAMEE** inaad waydiiso hadii uu jiro qof lagu kalsoonyahay kaas oo **taageeri** kara.
- ✓ **SAMEE** inaad weydiiso **ogolaansho** haddii aad la xidhiidhid qof kale adoo ku hadlaya magaca badbaadaha(sida.booliska ama haayad), hadii aanay ahayn xaalad nafta-halis ku ah.
- ✓ **SAMEE** oo **ixtiraam** xaqa uu qofku u leeyahay in uu isagu go'aanadiisa gaadho, laakiin ka fiirso caruurta ma ay awoodaan inay go'aankooda gaadhaan.
- ✓ **SAMEE** inaad ula dhaaqanto macluumaad kasta oo lagula wadaago sir ahaan.
- ✓ **SAMEE** oo ula hadal **qaab garabsiin ah** oo u xaqiiji badbaadaha **in aanu eeda rabshada marnaba lahayn.**

AAN LA SAMAYN:

- ✗ **HA** bixin macluumaad been ahama balan qaaadyo been ah.
- ✗ **HA** soo usoo bandhgin waanooyiinkaaga, kuwa kalena ha barbar dhigin, ama haka soo qaadin inaad adigu ogtahay waxa u wanaagsan.
- ✗ **HA** isku dayin inaad dhexdhexaadisid, ama aad dhinac la safatid ama inaad u heshid xal qofka dhibka geystay.
- ✗ **HA** isku dayin inaad inaad la wadaagto macluumaad khuseeya qofka ama dhacdada cid kale, marka laga reebo inaad fasax ka haysato qofka badbaadaha ah.
- ✗ **HA** waydiinin macluumaad ama ha isku dayin inaad ogaato waxa dhacay intaa inayr kadib.
- ✗ **HA** isku dayin inaad ka shakisid, xukuntid, ama ka hortimaadid waxa uu qofku kuu sheegayo.

TUSALOONYINKA WAXA LA DHAHO

- ✓ “Waan ku aaminsanahy.”
- ✓ “Wada sheekeysigeenu waxa u ku koobnaan doonaa inaga dhexdeena .”
- ✓ “Waxaan isku dayi doonaa inaan ku taageero intii karaankeyga ah, laakiin ma ihi xirfadle waxaan kugu wargelin doonaa meesha aad ka heli karto caawimaad.”
- ✓ “Sideen ku taageeri karaa?”
- ✓ “Wixii dhacay khaladkaaga ma ahayn.”
- ✓ “Waan ka xumahay in ay taasi kugu dhacday.”
- ✓ “Meeshan ma ku dareemaysaa ammaan adigu? Mase jirtaa meel kale oo aad ku dareemi karto in aad ku nafisaysid wada hadalkan inan yeelano?”
- ✓ Waad ku mahadsan tahay inaad ila wadaagtay tani.”

KA FAGOW:

- ✗ “Way ka sii xumaan kari lahayd. Waad nasiib badan tahay wax ka sii xun ma aysan dhicin.”
- ✗ “Ma aha qaladkaaga, laakiin malaha ma ahayn inaad samasyso wax arinka kicinaya/sababaya.



ADEEGYADA DIYAARKA U AH KA BADBAADAYAASHA GBV-GA

Waydii badbaadaha **baahiyahooda degdega ah**. Xasuusnoow haddii qofka uu la kulmay tacadi galmo ama xadgudub jireed 72-dii saacadood ee la soo dhaafay, waa inaad u sheegtaa inay sida ugu dhakhsaha badan u booqdaan isbitaalka ugu dhow. 72 saacadood ama saddex maalmood gudahooda tan iyo markii ay dhacdadani dhacday, Waxaa weli jira waqti la heli karo daawaynta si looga hortago infekshanka HIV-ga iyo in laga caawiyo ka hortagga uurka.

Haddii **ay dareemaan cabsi iyo ammaan darro**, fadlan ku dhiiri geli inay la xiriiraan Booliiska (lambar: 100) ama mid ka mid ah khadadka caawinta ee hoose si ay u helaan taageero. Xadgudubyada ka dhanka ah qof kasta, haweeney, nin, ama ilmo waa dembi ciqaabeed uu ciqaabayo sharciga Giriigga, dhibanayaasha rabshadaha waxaa ilaalin kara dawladda Giriigga. Haddi aad **markhaati ka tahay fal Rabshadeed nooc kastaba ha ahaadee**, waxa uu sharciga waajib kaaga dhigayaa inaad u wacdo booliska si toos ah inta ay dhacdadu dhacayso, soo fara galinta booliskuna waxa ay noqon kartaa naf badbaadin.

rabshada ka dhanka ah qofka ka yar 18-jrika , waxa sharcigu waajib kaaga dhigaya inaad ku war galiso booliska , kaliya maaha marka ay dhacdadu dhacayso.



KHADADKA CAAWIMADA

Booliska 100	Ambalaaska 166	Xaalada Degdega ah 112
-----------------	-------------------	---------------------------

- **Rabshada ka dhanka ah haweenka 15900:** SOS Khadka caawinta ee GSDFPGE ee taageerada haweenka (*Griig ,ingiriis*)
- **Ka ganacsiga/tahariibinta ganacsiga ah 1109:** A21, taageero sharci ahaana iyo mid maskaxeed oo la siiyo dadka halista ugu jira ka ganacsiga tahariibiinta iyo dadka lagu soo dhibaateyey ka ganacsiga tahariibinta (*tarjumaad in ka badan 200 oo luqadood ayaa diyaar ah*)
- **Gargaarka Bulshada ee Degdega ah 197:** EKKA Khadka Caawinta Ilaalada, Macluumaadka, Hagitaanka, Taageerada Cilmi-nafsiga Bulshada iyo Gudbinta (*Giriig,Ingiriis*)
- **LGBTQI+ 6971693446:** Khadka caawinta ee Emantes (WhatsApp), Macluumaadka iyo taageerada ee dumarka dumarka u galmooda, ragga ragga u galmooda, dadka labka iyo dhediga u galmooda, dadka jinsiigooda badalay, dadka labaw dhadiga ah iyo dadka arimaha Galmada aan shardiga ku xidhin (LGBTQI+) ee qaxoontiga ah kuna nool Giriiga (*waxa uu badanaa u shaqeeyaa qoraal ahaan iyo qoraal fasiraha Google, laakiin turjumaada waxaa la heli karaa iyada oo luqado kala duwan ah, hadii la codsado*)



UNHCR
The UN Refugee Agency

Ύπατη Αρμοστέία του ΟΗΕ για τους Πρόσφυγες
Αντιπροσωπεία στην Ελλάδα

Μιχαλακοπούλου 91, 11 528, Αθήνα
Τηλ. 216 2007800 | Fax 210 6726417
Email: great@unhcr.org | www.unhcr.org